



Degmada oo bilawday dadaal la iskugu dheelitirayo isqorista iyo barnaamijyada

Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa bilaabay nidaam laba sano ah oo lagu dejinayo qaab loogu talagalay isku dheelitirka isqorista iyo barnaamijyada dugsiga ee guud ahaan degmada. Ujeedadu waa in xogta iyo talooyinka bulshada la isticmaalo si loo dhiso qorshe si wanaagsan looga sii fikiray oo loo siman yahay oo wax ka qabanaya dhammaan dugsiyada iyo barnaamijyada iyo sidoo kale ardayga muddada gaaban iyo kuwa muddada fog wax barata, shaqaalaha iyo baahiyaha bulshada.

Degmada ayaa shaqaaleysiisay shirkadda dhanka talo bixinta oo saldhigeedu yahay Portland ee FLO Analytics si ay gacan uga geysato nidaamkan. Shaqada ilaa iyo hadda la qaybtay waxaa ka mid ah: daraasad lagu sameeyay nidaamyada degmada ee hore; qeexida baahiyaha hadda ee degmada; wareysiga wax daneeyayaasha; sameynya baaritaan iyo qiimeyn hore oo ku saabsan isqorista dugsiga iyo awooda uu wax ku qaado ‘capacity’; dib u eegida barnaamijyada iyo siyaasadaha hadda jira. Ujeedadu waa in si fiican loo qeexo mashruuca isla markaana la tilmaamo ujoodooyinka iyo qorshayaasha loogu talagalay ka qayb qaadashada bulshada ee labada sano ee soo socota.

“Talaabooyinkani hore waxay qaataan waqtii,” ayuu sheegay Tyler Vick, oo ah Maamulaha FLO Analytics. “Nidaamka isku dheelitirka degmada oo dhan waa mid adag: isbeddelada lagu sameynayo barnaamijka ama dugsigu wuxuu saameyn ku yeelan karaan dadka kale—iyo in ay dareemaan ardayda iyo qoysaska guud ahaan degmadu. Wuxaan rabnaa in aanu u wadno nidaamka si taxadar leh isla markaana si wanaagsan looga sii fikiro labada sano ee soo socota.”

Mashruucu wuxuu yeelan doonaa maclumaaad cusub oo joogta ah iyo fursado loogu talagalay waalidiinta, shaqaalaha iyo dadka kale si ay dadka ula wadaagaan fikrahahooda.

“Waxyaabo badan ayaa keena nidaamkani ,” ayay sheegtay Ku xigeenka Kormeeraha Guud ee Claire Hertz. “Iyada oo taageero laga helayo bulshadeena, waxaanu si taxadar leh u fiirin doonaa mid kasta.”

Xogta la soo ururiyay iyo talooyinka loo baahan yahay waxaa ka mid ah maclumaaad qaarka mid ah dugsiyada K-8 loogu beddelayo in ay noqdaan qaabka dugsiga hoose-dhexe. Nidaamka waxaa lagu aqoonsan doonaa caqabadaha dhanka isqorista siyaadada ah iyo isqorista hooseysa, ogaanshaha sida awodaha uu dugsigu u leeyahay in uu wax ku qaado ‘capacities’ ay isku beddelayaan iyada oo sababtu tahay maalgelinta daymeed ee la xiriirta dhismaha, iyo sida waxyaabaha kale u saameeyaan isqorista ardayda mustaqbalka iyo meelanya barnaamijka.

Xagaagan kooxda mashruucu waxay sii wadi doontaa in ay diiradda saarto wargelinta iyo ka qayb gelinta bulshada, gaarida iyo qabashada wareysiyo lala yeesho maamulayaasha dugsiyada, la-taliyayaasha PTA, ururada bulshada iyo wax daneeyayaasha. Natijjooyinka waxaa la iskula wadaagi doonaa website-ka, wargeesyada, warbaahinta bulshada iyo meelo dheeraad ah. Nidaamku wuxuu bilaabmayaa in uu hawli ku socdo xilliga dayrta, marka shaqadani gaarto meeshii u sarreysay – *Warbixinta Isqorista, Awooda Wax Qaadista ee Dugsiga iyo Falanqeynta Barnaamijka* – waxaa loo soo bandhigi doonaa guddiga dugsiga.

Dabayaqaqada 2019-ka degmadu waxay bilaabi doontaa ka qayb gelin ballaaran oo dadka laga qayb geliyano hawsha si qiimaha ay bulshadu leedahay loogu daro dejinta wejiga hore ee waxyaabaha la soo jeedinayo ee loogu talagalay isku dheelitirka isqorista iyo barnaamijyada. Waxyaalahani la soo jeedinayo ayaa si dadweynaha oo dhani arki karaan loo qiimeyn/eegi doonaa inta lagu jiro 2020-ka, iyada oo waxyaabaha la soo jeedinayo ee dambeeyana la soo bandhigi doono horraanta 2021-ka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama in laga qayb qaato, fadlan booqo

<https://www.pps.net/Page/13615>.